

Qoysaska iyo daryeelayaasha, waxaad door muhiim ah ka ciyaaraysaa waxbarashada luuqada cunugaaga. Ujeedada shaqadaan waa in laga caawiyo carruurta inay bartaan xirfadaha hadalkooda, dhagaysigooda, iyo wax qoristooda ayagoo waraysi ka qaadaaya qof qoyska ah ama saaxiib kadibna la wadaagaaya waxa ay bardeen. Waxaad ka caawin doontaa cunugaaga inuu diyaariyo su'aalaha waraysiga uuna ka fakaro sida uu usoo koobaayo waraysiga.

Niyada kuhaay:

- Adigga iyo cunugaagu waxaad adeegsan kartaan luuqadaada hooyo ama Ingiriis, hadba kii kuugu xoog badan adigga.
- Ku barashada erayada cusub luuqadaada hooyo ayaa sidoo kale ka caawinaysa cunugaaga inuu barto Ingiriiska.
- Waqtigaan la qaado cunugaaga. Wax isla barashadu waa baashaal!

Maxaa diirada loo saarayaa hadalka iyo wax qorista?

Carruurta waxay xoojiyaan luuqada ku hadalka iyo qorista marka ay la hadlaan qof, ay qortaan qodobada muhiimka ah, ayna soo koobaan waxa ay bartaan.

Aan biloowno!

Raac tallaabooyinka soo socda. Aan gadaal ka eegno taageerooyinka luuqada oo dheeraad ah.

Talaabada 1 aad: Ka caawi cunugaaga **inuu doorto qof qoyska kamid ah ama saaxiib**, si wadajir ahna uga fakara waxa cunugaagu doonaayo inuu ogaado.



▶ **Talaabada 2 aad:** Ka caawi cunugaaga **qorista su'aalaha waraysiga**. Ka fiirso erayada **qofkee, maxay, meesha, goorta, sababta, ama sida** oo ah billoowga su'aasha. Sida habboon daawada waraysi ka socda TV si aad u aragtaan noocyada su'aalaha ee dadku iswaydiyaan.

Talaabada 3 aad: U sheeg cunugaaga **inuu waraysi ka qaado qof qoyska amid ah ama saaxiib**, si fool ka fool ah ama khadka taleefanka. Ku dhiiri geli inuu qodobada muhiimka qorto intuu su'aalaha waydiinaayo.

Carruurta da'yarta ah ayaa u baahan kara taageeradaada si aad ugu qorto qodobada muhiimka ah ama aad u xasuusiso waxa qofku ku jawaabay.

Talaabada 4 aad: U sheeg cunugaaga **inuu soo koobo waraysiga**. Tusaale, wuxuu sawiri karaa sawir ama wuxuu qori karaa sheeko ku saabsan waxa uu bartay. Waxaad siin kartaa taageerada wax qorista markuu u baahdo.

Talaabada 5 aad: Xaqiiji inuu kuusoo bandhigo **qoraalkiisa** iyo qofka uu waraysiga ka qaaday uuna wada sheekaysi kaala yeesho waxa uu bartay.



Taageerooyinka Dheeraadka ah ee Luuqada

Iskuday in cunugaagu adeegsado su'aalaha hoose intuu waraysiga ka qaadaayo qofka muhiimka ah.

Soo jeedinada Su'aalaha Waraysiga*
Sidee ayay ahayd carruurnimadaadii? Qofkee ayaad la noolayd? Xagee ayaad ku noolayd? Shaqadee ayaad jeclayd inaad qabato?
Waa maxay xasuusta aad ugu jeceshahay?
Qofkee kamid ah qoyskaaga?
Xagee kale ayaad ku noolaan jirtay?
Waa maxay khibrada aad wax badan ka baratay?
Waa kee qofka waxa wayn ka badelay nololahaada? Sababta?
Waa maxay qaar kamid ah cuntooyinka aad aad ugu jeceshahay? Ciyaaraha? Xayawaannada?
Ciyaartee ayaad ugu jeceshahay? Filinka TV ga? Filimaanka?
Maxaad ku wanaagsan tahay? Maxaa dhib kugu ah?
Shaqooyin noocee ah ayaad kasoo shaqaysay?
Haddii aad hal wax codsan lahayd, muxuu noqon lahaa?

*Ogoow: Iska ilaali su'aalaha keliya jawabtoodu noqonayso haa ama maya.

Sii cunugaaga soo jeedinnada hoose si uu usoo koobo waraysigiisa qoraal ahaan.

Fikradaha Soo koobida Waraysiga
Samee sawirka qofka
Qor sheeko ama qeexitaan kooban
Samee ishaaro sawir ah
Abuur Boor
Qor maqaalka wargays
Qor taariikh nololeedka qofka
U sheeg qof kale waxyaabaha ugu habboon ee aad baratay